

SIDA LOO CODSADO CUNTADA DUGSIGA EE BILAASHKA AH IYO KUWA QIIMAHOODA LA DHIMAY

Fadlan isticmaal tilmaamaha kaa caawinaya inaad buuxiso codsiga cuntada dugsigaa ee bilaashka ah iyo kuwa qiimahooda la dhimay. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay inaad u soo gudbisoo hal codsi reerkiiba, xitaa haddii ay caruurtaadu dhigtaan in ka badan hal dugsi oo ka tirsan Centennial School District. Codsiga waa in loo buuxiyaa si dhammystiran si loogu sharciyeeyo carruurtaada cuntada dugsigaa ee bilaashka ah iyo kuwa qiimahooda la dhimay. Fadlan u raac tilmaamahan siday iskugu xigaan! Tallaabo kasta oo ka mid ah tilmaamaha ayaa la mid ah tallaabooyinka ku yaal codsigaaga. Haddii wakhti kasta ha noqotee aadan hubin waxa ku xiga ee la qabanayo, fadlan la xirii Centennial School District, Dining Office 503-762-3670

FADLAN ISTICMAALQALIN (MA AHA QALIN RASAAS) MARKAAD BUUXINAYSO CODSIGA OO ISKU DAY INTA KARTIDAADA AH FAR WAAWAYN UGU QORTO SILA AKHRISAN KARO.

TALLAABO 1: LIIS GAREE DHAMMAAN XUBNAHA REERKA EE DHALLAANKA, IYO CARRUURTA, IYO ARDAYDA AH ILAA HEERKA FASAL EE 12.

Noo sheeg inta dhallaan, carruur, iyo arday ah ee ku nool reerkaaga. MA AHA kaliya uun inaad wax isku ahaataan adiga inay ka mid ah noqdaan reerkaaga?

Ayaan ku liis gareeyaa halkan? Marka buuxinayso qaybtaan, fadlan ku dar DHAMMAAN xubnaha ka tirsan reerkaaga ee:

- Carruurta da'da 18 ama kuwa ka yar ah OO waliba lagu taageero dakhliga reerka;
- Daryeelkaaga ugu hoos jira qorshe korin awgeed, ugu mutaysandhallin ah guri la'aan, muhaajir, ama baxsi ah;
- Ardayda dhigata [Centennial School District, iyada oo aan loo eegin da'da.

<p>A) Liis garee magaca cunug kasta. Farta waawayn ku qor magaca cunuga kasta. I isticmaal hal sadar oo ka mid ah codsiga canug kasta. Markaad farta waawayn ku qorayso, ku qor hal xaraf sanduuq kasta. Jooji haddii aad weydo meel aad ku qorto. Haddii ay carruurta ka badan tahay sadarrada ka badan tahay sadarrada lagu qorayo dusha codsiga, ku soo lifaaq xaashi labaaad oo aad ku qorto dhammaan macluumaadka looga baahan yahay carruurta dheeraadka ah.</p>	<p>B) Ilmuhu ma yahay arday dhigta [Centennial School District? Ku calaamadee 'Haa' ama 'Maya' hoosta tiirka cinwaakiisu yahay "Ardayga" si aad noogu sheegto carruurta dhigata [Centennial School District. Haddii aad ku calaamadsay "Haa," ku qor heerka fasalka ardayga tiirka 'Heerka Fasalka' ee xiga midigta.</p>	<p>C) Ma jiraan carruur qorshe korriin aad ugu hayso? Haddii carruurta aad liis garaysay ay yihiin carruur qorshe korriin kuugu hoos jira, calaamadee sanduuqa "Carruur Qorshe Korriin" ee ku xigta magaca ilmaha. Haddii aad KALIYA aad u codsanayso carruur kuugu hoos jira qorshe korriin, ka dib markaad dhammayso TALLAABO 1, Uga gudub TALLAABO 4. <u>Carruurta qorshaha korriinta ee kula nool ayaa u tirsanaan doonta xubno reerkaaga ka mid ah oo in lagu liis gareeyaa codsigaaga.</u> Haddii aad codsanayso labadaba rruur kuugu hoos jira qorshe korriin ahaan, iyo kuwaa aan ku jirin qorshaha korriinta, u gudub tallaabo 3.</p>	<p>D) Carruurta qaarkoodna ma yihiin guri la'aan, muhaajiriin, ama baxsi? Haddii aad aaminsan tahay inay midkoodna cunug ku qoran qaybtani ay qancinayaan sifayntan, calaamadee sanduuqa "Guri la'aan, Muhaajir, Baxsi ku Jir" sanduuqa ku xiga magaca ilmaha iyo <u>buuxiso dhammaan tallaabooyinka codsiga.</u></p>
---	---	---	--

TALLAABO 2: HAATAN XUBNAHA REERKA MIDKODNA MA QAYBQAATAAN BARNAAMIYADA SNAP, TANF, AMA FDPIR?

Haddii qof ka tirsan reerkaaga (oo aad adigu ka mid tahay) haatan u ka qaybqaato hal ama in ka badan barnaamijyada gargaarka hoosta ku qoran, caruurtaada ayaa u mutaysan cuntada bilaashka ah ee dugsigaa:

- Barnaamijka Caawimada Nafaqada Kaamilinta ah (SNAP) ama _____.

TALLAABO 2: HAATAN XUBNAHA REERKU MIDKODNA MA QAYBQAATAAN BARNAAMIYADA SNAP, TANF, AMA FDPIR?

- Gargaarka Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) ama _____.
- Barnaamijka Cunto Qaybinta Deegaannada Hinidida (FDPIR).

A) Haddii ayna qofna ka qaybqaadan reerkaaga barnaamijyada kor ku qoran midkoodna:

- Kaga tag bannaanida TALLAABADA 2 oo u gudub TALLAABADA 3.

B) Haddii qof ka tirsan reerkaagu ka qaybqaato midkoodna barnaamijyada kor ku qoran:

- Qor kees lambarka SNAP, TANF, ama FDPIR. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay inaad bixiso hal kees lambar. Haddii aad ka qaybqaadato mid ka mid ah barnaamijyadan oo aadan aqoon kees lambarka, la xiriir: DHS
- U gudub TALLAABO 4.

TALLAABO 3: KA WARBIXI DAKHLIGA DHAMMAAN XUBNAHA REERKA

Sideen uga warbixiyaa dakhligayga?

- Isticmaal jaartiga cinwaankoodu yahay "**Ilaha Dakhlige Qaangaarayaasha**" iyo "**Ilaha Dakhlige Carruurta**," ee ku daabacan gadaasha foomka codsiga si aad u ogaato haddii ay reerkaagu leeyihin dakhli ah inay ka warbixyaan.
- Ka warbixi dhammaan xaddiyada KALIYA DAKHLIGA GUUD ah. Kaga warbixi dhammaan dakhliga iyaga oo doollar buuxa ah. Ha ku darin sentiyada.
 - Dakhlige guud waa wadarta dakhli ee la helay kahor canshuurta
 - Dad badan ayaa u maleeeya inuu dakhligu yahay inta ay "guriga kula soo hoydaan" oo aan ahayn qaddarka wadarta, "guud" ah. Hubi in dakhliga aad kaga warbixiso codsigan AAN loo yarayn canshuur, ama qaddar xilliyeed caymis in la bixiyo, ama wax kasta oo qaddarro kale looga jaro lacag bixintaada.
- Ku qor "0" dulal-qor kasta oo ayna jirin dakhli laga warbixiyo. Dulal-qor dakhli kasta oo bannaan lagaga tago ayaa loo tirin doonaa eber ahaan. Haddii aad ku qorto '0' ama bannaan aad kaga tagto, waxaad caddaynaysaa (wacad ku qaadaysaa) inayna jirin dakhli aad ka warbixiso. Haddii ay saraakiisha deegaanku ka shakiyaan in dakhliga reerkaaga si khalddan looga warbixiyay, codsigaaga ayaa la soo baari doonaa.
- Calamadee inta jeer ee nooc kasta oo dakhli la helo adiga oo isticmaala sax ku samaynta sanduuqyada dul-qor kasta ee dhinaca midig ka ah.

3.A. KA WARBIXI DAKHLIGA AY KASBADEEN CARRUURTU

A) Ka warbixi dhammaan dakhliga ay kasbadeen ama ay heleen carruurta. Ka warbixi dakhliga guud ee isku darsan ee DHAMMAAN carruurta ku liis garaysan TALLAABO 1 ee reerkaaga guraha sanduuqa u ku qoran yahay "Dakhli Wadarta Ilmaha." Kaliya tiri dakhliga carruurta qorshe korriin ku jira haddii aad u codsanayso kalidood iyaga oo ka mid ah inta kale ee reerkaaga.

Waa maxay Dakhlige Ilmuhu? Dakhlige ilmaha ayaa ah lacag laga helo in ka baxsan reerkaaga oo sii TOOS ah loo siiyo carruurtaada. Reerar badan ayaa lahayn haba yaraate dakhli cunug.

3.B KA WARBIXI DAKHLIGA AY KASBADEEN QAANGAARAYAASHU

Ayaan halkan ku liis gareeyaa?

- Markaad buuxinayso qaybtaan, fadlan ku dar DHAMMAAN xubnaha qaangaaraha ah ee reerkaaga ku nool eee aad wadaagtaan dakhliga iyo kharashyada la nool yihiin, xitaa haddii aanay la xiriira iyo xitaa haddii aydaan wax isku hayn iyo xitaa haddii ayna helin dakhli iyaga u gaar ah.
- **HAKU darin:**
 - Dadka kula nool ee aan laakiin aan lagu taageerin dakhliga reerkaaga OO aan dakhliku soo biixin reerkaaga.
 - Carruurta iyo ardayda horay ugu liis garaysan TALLAABADA 1.

a) liis garee magacyada xubnaha reerka ee qaangaaraha ah. Far waawayn ku qor magaca xubin kasta ee reerka ka tirsan sanduuqyada aya ku qoran yihiin

b) Ka warbixi dakhliga laga helo shaqada. Kaga warbixi dhammaan dakhliga laga helo shaqada meesha codsiga ku taal ee "Ka Kasbashada Shaqada". Taasi badiyaa waa lacagta laga helo ka shaqaynta shaqooyinka. Haddii aad leedahay meherad iskaa u

c) Ka warbixi dakhliga laga helo gargaarka dowladda/taageerada ilmaha/taageerada afada ama seyga. Ka warbixi dhammaan dakhli khuseeya dul-qorka codsiga ee " Gargaarka Dowladda/Taageerada Ilmaha/Taageerada Afada Ama Seyga .

TALLAABO 3: KA WARBIXI DAKHLIGA DHAMMAAN XUBNAHA REERKA

<p>"Magacyada Xubnaha Reerka ee Qaangaarka ah (Hore iyo dambe)." Ha ku qorin xubno kasta oo aad ku liis garaysay TALLAABADA 1. Haddii u ilmaha ku qoran TALLAABADA 1 u leeyahay dakhli, raac tilmaamaha TALLAABADA 3, qaybta A.</p>	<p>shaqaysi ah ma aad leedahay beer, waxaad ka warbixin doontaa dakhligaaga saafiga ah.</p> <p>Maxaan sameeyaa haddii aan ahay iskii u shaqayste? Ka warbixi dakhliga aad ka hesho shaqadaas ahaan qaddar saafi ah. Taasi waxa lagu xisaabiyaa iyada oo laga jaro wadar ahaan kharashyada hawlgalka ee meheraddaada kuwa aha soogalka guud ama dakhliga ah.</p>	<p><u>Haka warbixin inta tahay qiimaha lacagta dheefo kasta gargaar dowladeed qiimaha lacagta caddaanka ah ee AAN ku qornayn jaartiga.</u> Haddii dakhli laga helo taageero ilmo ama taageero afo ama sey, kaliya ka warbixi biximaha ay maxkamaddu amartay. Biximaha aan rasmiga ahayn ee laakiin joogtada ah waa in looga soo warbixiyaa ahaan dakhli "kale" gudaha qaybta xigta.</p>
<p>d) Ka warbixi dakhliga laga helo beshinka/hawl ka fariisiga/dhammaan dakhliga kale. Ka warbixi dhammaan dakhliga khuseeya dul-qorka ku yaal codsiga ee beshinka/hawl ka fariisiga/dhammaan dakhliga kale.</p>	<p>e) Ka warbixi wadarta tirada reerka. Geli wadarta tiro ee xubnaha reerka gudaha du-qorka "Wadarta Xubnaha Reerka (Carruurta iyo Qaangaarayaasha)." Tiradaasi WAA inay la mid noqotaa tirada xubnaha reerka ee ku qoran TALLAABO 1 iyo TALLAABO 3. Haddii ay jiraan xubno ka tirsan reerkaaga oo aadan ku qorin codsiga, ku noqo oo iyagana ku dar. Aad aya muhiim u tahay inaad liis garayso dhammaan xubnaha reerka, maadaama tirada reerkaagu ay saamayn ku leedahay mutaysigaaga cuntada bilaashka ah iyo kuwa qiimahooda la dhimay.</p>	<p>f) Bixi afarta tiro ee ugu dambaysa Lambarkaaga Sooshal Sekuuritiga. Xubin qaangaare ah oo reerka ka tirsani waa inuu galiyaa meesha loogu talagalay afarta tiro ee ugu damabysa Lambarkooda Sooshaal Sekuuriti. Waxaad u mutaysan tahay inaad codsato dheefaha xitaa haddii aadan lahayn Lambarka Sooshal Sakuuritiga. Haddii ayna xubnaha reerku lahayn Lambar Sooshal Sakuuriti, kaga tag meeshan bannaanida oo calaamadee sanduuqa midigta ka xiga ee ay ku qoran tahay "Calaamadee haddii aanu jirin #SS."</p>

TALLAABO 4: MACLUUMAADKA KULA XIRIIRKA IYO SAXEEXA QAANGAARAHA

Dhammaan codsiyada waa inay saxeexaan xubnaha qaangaraha ah ee reerku. Qofka oo saxeexa codsiga, ayuu xubintaas reerku wacad ku qaadaayaa in dhammaan macluumaadka looga warbixiyay si run iyo dhammaystirnaan ah . Ka hor intaadan buuxin qeybtan, fadlan waliba hubi inaad akhrisato bayaannada xogdhowrka iyo xuquuqda madaniga ee ku yaal gadaasha codsiga.

<p>A) Bixi macluumaadka lagugula soo xirirayo. Ku qor cinwaankaaga hadda dulqorka loogu talagalay haddii macluumaadkan la heli karo. Haddii aadan lahayn cinwaan joogto ah, taasi kama dhigayso carruurtaada u mutaysi la'aan cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha laga dhimay. Inaad na siiso lambar telefoon, cinwaan iimayl, ama labadaba ma aha waajib, laakiin haddii aad na siiso waxay naga caawin doonta inaan adiga si dhakhso leh kuula soo xiriirno haddii aan u baahano .</p>	<p>B) Far waawayn ku saxeex magacaaga. Far waawayn kuqor magaca qofka qaangaraha ah ee saxeexaya codsiga oo qofkaas ayaa saxeexaya gudaha sanduuqa "Saxeexa qaangaraha".</p>	<p>C) Ku qor taariikhda maanta. Meesha bannaan ee loogu talagalay, ku qor taariikhda maanta gudaha sanduuqa.</p>	<p>D) Nala wadaag aqoonsiga isireed iyo qowmiyadeed carruurtaada (waa ikhtiyaari). Gadaasha codsiga, waxaan kugu weyddiisanaynaa inaad nala wadaagto macluumaadka ku saabsan isirka iyo qowmiyadda carruurtaada. Dulqorkaasi waa ikhtiyaari oo saamayn kuma laha u mutaysiga carruurtaada cuntada dugsiga ee bilaashka ah ma qiimaha laga dhimay.</p>
---	---	---	--